

Xeerarka farxad wada qaadashada oo Lundbybadet

Meeshaan waxaa adiga ka akhrisankartaa tilmaamaheena iyo sidaa adiga oo macmiilkeena ah uga qeyb-qaadankartid hubinta ammaanka, farxada iyo booqasho wanaagsan!

Fadlan ku soo dhawoow oo la soo xiriir shaqaalaheyna haddii adiga dooneysid in lagu caawiyo ama su'aal na weeydiineysid.

XEERARKA FARXAD WADA QAADASHADA OO LUNDBYBADET

- Dhammaan booqashada iyo isticmaalida goobta adiga baa mas'uul iska ah.
- Goobta waxaa markasto joogo shaqaalo oo joogo meelaha dabaasha, laakiin adiga waxaa markasto mas'uul ka tahay ammaankaada iyo ammaanka martida kale.
- Markasto ka warhaay carruurta kula socdo! Adiga oo qofka weeyn ah oo la socdo carruurta aan qaangaarin baa mas'uul ka ah carruurta intaa meesha joogtiin oo dhan.
- Dhammaan dadka iney dabaashaan u imaadeen oo 18 sano ka yar, oo dabaal aqoon, waa qasab iney markasto la dabaashaan qof weeyn oo mas'uul ka ah (oo 18 sano ka weeyn) oo dabaal yaqaan.
- Shaqaalaha waxeey xaq iney meesha ka saaraan qof booqasho dabaaleed meesha ugu imaaday laakiin ku dhaqmeyn xeerarka goobta dabaasha. Haddii goobta lagaa saaro adiga laguu ma soo celinaayo lacagtii aad bixisay markaa soo galeysay.
- Anagoo xushmeyneyno martida kale oo dabaalanaayaan anaga ma oggolin wax sawirid/filim duubid iyo qalabkale oo la dhibsankaro intaa goobta joogtid.
- Siggaar cabbid waa ka mabnuuc gudaha goobta.

NADAAFADDA SAXADA DABAASHA

- Adiga waa inaa markasto sifiican isku dhaqdaa iyo jirkaada oo dhan dhaqdaa iyo timahaada intaadan dabaasha bilaabin, biyo ku tababarashada iyo qolka la isku kulleeyo. Iska dhaq xitaa waxyaabaha la isku qurxiyo.
- Haddii aadan dooneyn inaad timaha dhaqdo waa inaad isticmaashid koofida dabaasha. Koofida dabaasha waxaad ka heli goobta.
- Istimaal dharka dhabaasha/burkini. Dharka qaarkood oo laga suubiyay lycra waa la ansaxinkara oo dhar dabaal ahaan, weeydii shaqaalaha intaadan dabaasha bilaabin.
- Lama oggola in surwaalka dabaasha kastuumo laga hoos xirto.
- Carruurta xafaayada isticmaalo waxey leeyahiin surwaalo dabaaleed oo qaas ah.
- qolka la isku kululeeyo waxaad gali adigoo qaawan iyo adiga waxaad isticmaali shukumaan aad ku fadhiisatid.

WARBIXIN KALE

- Dhammaan dadka soo galaayo goobta waa iney bixiyaan lacag inteysan soo galin, haddii xitaa aad tahay wehel kaliya. Lacag bixinta waa halkaas mar aad soo galeysid (oo adiga haddii aad ka baxdid goobta oo dooneysid inaad dib ugu soo noqotid waa inaa hadana lacag cusub bixisaa sidaa u soo galikartid).
- Haddii aad dabaalanaysid adigoo qof weyn kula socon waxaa qasab ah inaad adiga dabaalankartid 200 mitir iyo ugu yaran ahaatid 12 sano jir.
- Haddii aad dooneysid inaad isticmashid qeybta nasiinada waa qasab adiga inaad tahay 18 sano jir iyo bixisid qarashka qaaska oo meeshaas lagu galo.
- Adiga waxaad ubaahantahay quful sidaa armaajada u qufulankartid. Quful horey u soo qaado ama qeybta qasnadda ka iibso. Armaajooyinka qufulan waxaa la firaaqeeyaa habeenkasto.
- Goobta dabaasha waxaa laga helaa sanduuqyo wixii qiimo leh lagu xirankaro (quful) iyo qeybta qasnadda (shilin oo 10 karoon).
- Goobta gudaheeda xuduudka kabaha waa qeybta qasnadda. Istimaal bacda kabaha difaaco haddii aad dooneysid inaad kabahaada geysatid armaajadaada.
- Adiga baa mas'uul ka ah alaabtaada qiimaha leh/waxaad iska leedahay.
- Tartiib u socio! Goobta oo dhan waxaa halis ah in la kufo.

QOLKA LAGU TABABARTO/KOOXDA LALA TABABARTO

- Adiga waa inaad ugu yaran sannadkaas buuxineysid 14 sano, haddii aad ka qeyb-qaadaneysid kooxda lala tababarto.
- Adiga waa inaad ugu yaran sannadkaas buuxineysid 16 sano, haddii aad dooneysid inaad ku tababartid qolka lagu tababarto.
- Xushmeyn martida kale dartood iyo ammaanka canugaaga lama oggola in carruur lala galo qolka lagu tababarto.
- Adiga waa inaad horey ugu soo qaadataa shukumaan qolka lagu tababarto.
- Waa ku mahadsantahay inaad miisanyada meeshooda ku celisid iyo tirtirtid mashiinada markaa isticmaashid kadib.

Anaga waxaa kamid nahay mashruuc mukhaadaraad ka hortagid – boqolkiiba 100% tababar xoog oo nadiif ah.

LUNDBYBADET



Mjölby Kommun